Ku dhaqan Xafiis D.

# Faafinta Rasmiga ah
# الجريدة الرسمية
# Official Bulletin

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 10aad** **Muqdisho, 31 Maarso 2023** **Lr. 1**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**FAAFIN BILAHA SOO BAXAY**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

## BILAHA

## JANUARY, FEBRUARY, MAARSO

# 2023

SHARCI LR.011

Taariikh: 20 Maarso 2023

**OGOLAANSHO ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA DHOWRISTA MAALGASHIGA IYO MAALGASHATADA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka **XGGSH/0239/B11/23**, ku taariikheysan **14/03/2023**, kuna saabsan **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Dhowrista Maalgashiga iyo Maalgashatada.**

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Dhowista Maalgashiga iyo Maalgashatada.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-030-23
TAARIIKH: 26/3/2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA OFFICE OF THE PRESIDENT

**Madaxweynaha J. F.S**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

# JUMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## GOLAHA SHACABKA

# HINDISE SHARCIYEEDKA DHOWRISTA MAALGASHIGA IYO MAALGASHATADA

JAMHUURIYADDA FEDERALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA
THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC
HOUSE OF THE PEOPLE
GOLAHA SHACABKA

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## CUTUBKA 1AAD
## QODOBBO HORUDHAC AH

### Qodobka 1aad
### Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa loogu yeerayaa Sharciga Dhawrista Xuquuqda Maalgashiga iyo Maalgashatada.

### Qodobka 2aad
### Mabda'a Guud

Mabda'a Guud ee Sharcigan waa Ilaalinta maalgashiga iyo maalgashatada si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda dalka

### Qodobka 3aad
### Erey bixin

Inta lagu guda jiro Sharcigan, haddii aan si kale loo dhigin:

1. "**Dastuur**" waxaa loola jeedaa Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
2. "**Khilaaf**" Waxaa loola jeedaa isfaham u-dhaxeeya dowladda iyo maalgashade ama maalgashatada dhaxdooda kaa soo lagu xalin doono shuruucda dalka si waafaqsan qodobka 16aad ee Sharcigan;
3. "**Maalgashi** toos ah" waxaa loola jeedaa maalgashi, ha ahaado mid keli ah ama kuwo la isu geeyay, mid cusub, mid hore u jiray, kaa oo u saamaxaya maalgashade ama koox maalgashata ah inay sameeyaan,helaan ama ku yeeshaan saami ganacsi faaiido doon ah;
4. "**Shirkad**" waxaa loola jeeda unug kasto oo ku hawlan dano ganacsi oo rasmi ah kana diiwan gashanJamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
5. "**Jamhuuriyadda Federaalka**" Waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
6. "**Maalgashade shisheeye**" waxaa loola jeedaa shirkad ama qof shisheeye ah taasoo Hanti-maalgashi ku sameeyay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaa sidoo kale soo galaya qof Soomaali ah oo Maalgashigisa ku diiwan gashaday/gashatay dhalasho shishiiye;
7. "**Tabasho**" waxaa loola jeeda dhibaato uu ka cabanayo maalgashade/maalgashato;
8. "**Xarunta Caalamiga ah ee Xallinta Khilaafaadka Maalgashi**"- waa Hay'ad caalami ah oo madax bannaan taas oo ku hawlan xalinta khilaafaadka caalamiga ee maalgashi;
9. "**Maalgashade**" waxaa loola jeedaa maalgashade dalka u dhashay ama shisheeye ah;
10. "**Faa'iido joogta ah oo lagu leeyahay**" waxaa loola jeeda lahaanshiyaha ugu yaraan boqolkii**ba** 10 awoodda codaynta shirkad ganacsi ama wax la mid ah oo lagu yeesho ganacsi aan shirkad ahaan u abaabulnayn.
11. "**Maalgashade dalka u dhashay**" waxaa loola jeeda Muwaadin soomaaliyeed oo maalgashaday Dalka;
12. "**Talaabo/Go'aan Dowladeed**" waxaa loola jeeda talaabooyin ama Go'aano Dowladda soo saartay oo saameynaya maalgashade ama maalgashagiisa;
13. "**Wasiir**" waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo HorumarintaDhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya;

14. **"Wasaarad"** waxaa loola jeedaa Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya;
15. **"Damaanadda Maalgashi ee Dhinacyada-badan"** damaanadda caymis ee ay bixiso Hay'adda Damaanadda Maalgashi ee Dhinacyada-Badan. (Multilateral Guarentee Agency-MIGA);
16. "**Tilmaan**" waxaa loola jeedaa talo lagu bixiyay hanaan xeer-nidaamineed;
17. **"Dib u la noqosho"** waxaa loola jeedaa maalgashade hantidiisa kala baxaya Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
18. "**Xeer-nidaamiye**" waxaa loola jeedaa xeerar ka dhasha sharcigan;

    **"Xukuumadda"** – waxaa loola jeedaa Dowladda Federaalka

    Soomaaliya;
19. **"Sharcigan"** waxaa loola jeedaa Sharciga Dhawrista Maalgashiga iyo Maalgashatada, 2023.
20. "**Sharcigan**" waxaa loola jeedaa Sharciga Dhawrista Maalgashiga iyo Maalgashatada, 2023. Sharciganwaxaa loo fasirayaa, loona dhaqan-galinayaa si waafaqsan:

    (b) Dastuurka iyo shuruucda maalgashiga ee dalka;

    (t) Axdiyada iyo heshiisyada maalgashiga ee caalamiga ah ee xubinta ay ka tahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

"**Qarameyn dadban**" waxaa loola jeeda talaabo kasto oo ay qaado dowladdu taasoo si aan toos aheyn ugu yeelato saameyn hantida maalgashade;

**Qodobka 4aad**

**Ujeedada Sharciga**

1) Sharcigaan wuxuu Ilaalinaya xuquuqda maalgashatada iyo maalgashigooda si waafaqsan **qodobka 26aad ee Dastuurka** iyo shuruucda dalka isla markaana wuxuu dhiirigalinaya in dalkeena la maalgashado, iyadoo loo marayo qaab isu dheelli tiraya danaha guud ee xuquuqda iyo waajibaadka maalgashatada.
2) wuxuu Sugaya xaqqa madaxbanaanida Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya u leedahay inay u nidaamiso maalgashatada si waafaqsan danta guud.
3) Hubinta xuquuqda dastuuriga ah ee ku cad Dastuurka iyo shuruucda khuseeya maalgashatada iyo maalgashiyada Jamhuuriyadda Federaalka; iyo
4) Xoojinta shuruucda iyo xeerarka dhaqangalka ah ee khuseeya maalgashiyada iyo arrimaha xiriirka la leh.

**Qodobka 5aad**

**Baaxadda Sharciga**

Sharcigan waxaa lagu dhaqayaa:-

(b) Dhammaan maalgashiga ka jira iyo kuwa laga abuuri doono dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee loo sameeyay si waafaqsan Shuruucda dalka.
(t) Dhammaan maalgashiga ka dhasha heshiisyada caalamiga ah ee dhinacyada badan iyo kuwa laba-geesoodka ah ee ay qayb ka tahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
(j) sido kale sharcigaan wuxuu nidaaminayaa dhamaan heshiisyadda maalgashi ee gudaha JFS
(x) Xukuumada Federaalka Soomaliya waxa ay soo sareysa siyaasado lagu jaan gooynaya xadiga, baaxadda iyo qeybaha hortabinta u leh maaalgashiga shisheeye.

## CUTUBKA 2AAD
## HABKA LAGU DHAQAYO MAALGASHIGA IYO MAALGASHATADA
### Qodobka 6aad
### Nidaam maamul oo ku dhisan Cadaalad iyo Sinnaan

1) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa ay dejineysa nidaam maamul oo ku dhisan caddaalad iyo sinnaan oo ay u siman yihiin maalgashatada dalka udhashay iyo kuwa shisheeyaha ah sida ay tilmaamayan shuruucda iyo xeerarka dalka.
2) Dawladda Soomaaliya waxay u samaynaysaa garsoor cadaalad ah oo ay u simanyihiin maalgashiga/maalgashatada dalka, si waafaqsan shuruucda dalka dhaqan galka ka ah.
3) Dawladda waxay dejineysaa habraacyo ay ku hubinayso go'aan qaadasho sababeysan ee maamul iyo garsoor kuna salaysan cadaalad iyo sinnaan, iyadoo ay qayb ka yihiin maalgashadayaasha dalka u dhashay iyo kuwa shisheeyaha ah.
4) Maalgashatada shisheeye iyo kuwa wadaniga ah waxey xaq u leeyihiin in ay si siman u helan xogaha maalgashi iyo fursadaha ganacsi ay dowladdu hayso.
5) Hadii khilaaf yimaado, maalgashatada iyo wixii la-xiriira maalgashiyadooda, waxay xaq u yeelanayaan in loo maro go'aan-ka-gaaristooda hab-dhaqan ku dhisan shuruucda dalka, dhagaysi daahfuran, cadaalad ku salaysan, oo maxkamad ka dhaca, ama, xaaladaha ay ku haboonaato, maxkamad gaar ah ama wadiiqo kale oo madax bannaan oo aan dhinacna u jan-jeerin.
6) Sababaynta iyo go'aannada maamul ee ku xusan faqradda (3) ee kore waxaa lagu bixinayaa qaab qoraal ah.
7) Dawladda waxay u sugaysaa amniga maalgashatada shisheeye iyo hantidooda si waafaqsan shuruucda maalgashiga ee wadanka iyo xeerarka caalamiga ah, iyadoo la tix-galinayo awoodda dhaqaale iyo mida tayo ee suurtagalka ah.

## CUTUBKA 3AAD
## YAGLEELIDDA IYO ILAALINTA MAALGASHIYADA
### Qodobka 7aad
### Yagleelka Maalgashiga (Establishment of Investments)

1) Dhammaan maalgashiga waxaa loo yagleelayaa si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka dhaqan-galka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2) Maalgashiga aan waafaqsanayn faqrada 1aad ee qodobkan, dalka kuma yeelanayo xuquuqda maalgashiga shiisheeye.
3) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya lagama yagleeli karo maalgashi kasta oo kahor imaanaya Diinta, dhaqanka/hiddaha ama saameyn taban ku yeelanaya deeganka iyo cimillada.
4) Maalgashatada shisheeye waa inay u hogaansamaan xeerarka shaqaaleysiinta muwaadiniinta Soomaaliyeed, mana shaqaaleysiin karaan shaqaale ajnabi ah oo aan ku imaan baahi aqooneed ama

mid xirfadeed.

## Qodobka 8aad
## Kala-sooc la'aanta Maalgashatada (Most Favoured Nation (MFN) Treatment).

1) Iyadoo loo hogaansamayo Dastuurka iyo shuruucda maalgashiga dalka iyo xeerarka caalamiga ah, Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya sinnaba looma takoori karo maalgashatada shisheeye.
2) Faqrada 1aad ee Qodobkan ma khusayso heshiisyada ay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ay la gasho, dawlado iyo ururro calami ah, sida midow canshuur, heshiis canshuur dhaaf dhaqaale, ama mid lacageed, suuq furan, ama aagagga-dhaqaale ee xorta ah.

## Qodobka 9aad
## Hab-dhaqan Siman (National Treatment)

1) Maalgashatada shisheeye iyo maalgashigooda waxaa loola dhaqmayaa si la mid ah maalgashatada Soomaaliyeed.
2) Mar kasta waxaa la tix galinayaa:
   (b) xajmiga uu leeyahay maalgashiga.
   (t) qaybta dhaqaale ee uu maalgashigu ku wajahan yahay.
   (j) saameynta togan ama taban ee uu maalgashiga ku leeyahay bulshada, deegaanka, shaqooyinka si toos ah iyo si dadban.
3) Qiimayntuna waa inaysan ku koobnaan keliya xaaladaha ku xusan Faqradda (2) ee qodobkan.

## Qodobka 10aad
## Dammaanad qaadka maalgashi

Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay dammaanad qaadaysa bad-qabka iyo amniga maalgashatada shisheeye iyo maalgashigooda si waafaqsan Dastuurka iyo shuurucda kale ee dalka.

## Qodobka 11aad
## Dhowrista Sharci ee xuquuqda Maalgashiga. (Legal Protection of Investment)

Maalagashatada shisheeye waxa ay xaq u leedahay in ay ku yeelato hanti (guurto ama ma guurto ah) gudaha dalka si waafaqsan qodobka **43aad** ee Dastuurka iyo shuruucda dhaqangalka ah ee Jamhuuriyadda FederaalkaSoomaaliya.

## Qodobka 12aad
## Soo gelinta iyo La Bixidda Lacagaha iyo Maalgashiga
## (Funds Transfer and Repatriation of Investments)

1) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa suuq furan oo xor ah, Maalgashatada shisheeyana waxa ay dalka soo galin karaan, Lana bixi karaan hanti maalgashi si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka dalka.
2) Hantida la soo galinayo ama laga saarayo dalka waxay noqon kartaa:

(b) Midda dalka la so galinayo:

i. Mid lagu yagleelayo maalgashi cusub.
ii. Mid Lagu horumarinayo ama lagu ballaarinayo maalgashi jiray.

(t) Midda dalka laga saarayo:

i. Faa'iidada maalgashiga,

ii. Dakhli hanti la iibiyay, lil tirka **(liquidation)** dhammaan ama qayb maalgashi,
iii. Bixin kharashyada ama daymaha heshiisyada dibadda,
iv. Mushaaraadka iyo xuquuqaha kale ee ajaanibtu ku yeeshaan maalgashiga,
v. Lacagaha lagu mutaysto magdhaw la xiriira qaramaynta maalgashiga, si waafaqsan Qodobka 13 ee Sharcigan
vi. Lacagaha loo qaato magdhaw lagu bixiyay khasaaro uu la kulmay maalgashade.
vii. Lacagaha lagu kala qaato xallinta khilaafaadka, si waafaqsan Qodobka 16 ee Sharcigan
viii. Lacagaha lagu bixiyo daymo heshiis ku salaysan taas oo lagu leeyahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya lacagahaas, loona shubayo maalgashade shisheeye
ix. Lacagaha kale ee ku tilmaaman sharciyo gaar ah ama xeer-nidaamiyeyaal dhaqangal ka ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

3) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay qaadan kartaa talaabooyin ay ku xadidayso ama hakineyso dirista ama la bixista lacagaha sida:
(b) Hadii ay jirto Xaalad dhaqaale iyo midda maaliyadeed oo khasbeysa xaddidaad noocaas ah;

4) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyada oo tix-raaceyso arrimaha ku xusan faqrada 3 (b), waxay u maraysaa qaab aan kala-sooc lahayn, oo saamaxaya in laga baaqsado dhibaato aan loo baahnayn oo ku iman karta danaha maaliyadeed iyo kuwa dhaqaale ee maalgashatada iyo maalgashigooda.

## CUTUBKA 4AAD
## QARAMAYNTA
### Qodobka 13aad
### Qaramayn (Expropriation)

1) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya lama wareegayso mana qaramaynayso hanti maalgashade shisheeye, kumana qasbayso maalgashadaha inuu hantidiisa maalgashi uga tanaasulo, si toos ah ama si dadban. Hadii looga maarmi waayo hantida maalgshadaha isticmaalka dan guud (Public Purpose, oo ay cadeeyen ha'adaha ku shaqada leh si aan kala sooc-laheyn (Non-discreminatory Manner) waala qarameyn karaa iyada oo la bixinayo magdhaw sugan oo ah qiimaha hantida lagala wareegay.
2) Magdhawgaas waa inuu u qalmaa qiimaha suuqa waqtiga la qarameeyay (taariikhda qaramaynta), ama isla waqtiga wargalinta, haddii ay qiimaha hantida saamayn silloon ku yeelatay wargalinta qaramaynta la dul-dhigay. Tilmaamaha lagu qiimaynayo waxaa ka mid ah, qiimaha hantida haddii ay sii shaqaynayso, qiimaynta guud ee hantida oo ay ku jirto qiimaynta rasmiga ah ee canshuurta hantida la taaban karo, iyo tilmaamihii kale ee haboon, si loo xaqiijiyo sicirka suuqa ee macquulka ah, kadib qiimeynta qiimo-dhaca ku yimaada qalabka maalgashi ee la qiimeynayo. Magdhawgu waa in lagu bixiya muddo aan ka badneyn 120 maalmood.
3) Maalgashatada hantidooda la qarameeyay waxa ay xaq u leeyihiin in ay ka-doodan habraaca qiimeynta qarameynta, si waafaqsan Shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, taas oo dib loogu eegayo kiiskiisa iyo qiimaynta maalgashiga si waafaqsan Mabaadi'da ku xusan cutubkan.
4) Hadii ay dhacdo cabasho ku aaddan qarameyn dadban, maalgashaduhu waxa uu xaq uleeyahay in uu cabashadaas u gudbiyo xafiisyadda qaran ee xalinta Khilafaadka ee la xiriira maalgashiga ama hay'adaha garsoorka dalka.
5) Hadii ay dhacdo cabasho ku aaddan qarameyn dadban, maalgashaduhu waxa uu xaq uleeyahay in uu cabashadaas u gudbiyo xafiisyadda qaran ee xalinta Khilafaadka ee la xiriira maalgashiga

ama hay'adaha garsoorka dalka.

### Qodobka 14aad

**Awoodda soo-saarista xeernidaamiye (Sovereign Right to Regulate).**

Wasiirka Wasaaradda, isaga oo latashanaya hay'adaha ay kala dhaxeyso hawlaha maalgashiga ee dowladda, waxauu soo saarayaa xeer-nidaamiyeyaal lagu dhaqan gelinayo qodobbada sharcigan.

## CUTUBKA 5AAD

## MAARAYNTA CABASHADA IYO XALLINTA KHILAAFAADKA

### Qodobka 15aad

**Maaraynta Cabashooyinka**

**(Grievances Management)**

1) Wasiirka waxa uu magacaabi karaa Guddiyo farsamo oo maareeya cabashooyinka la xiriira dhinacyada maalgashiga kahor inta aysan gaarin heer garsoor.
2) Hadii ay cabasho timaado, Maalgashaduhu wuxuu cabashada u soo gudbinaya Guddiyada ku xusan qodobkan farqadiisa 1aad.
3) Guddiyada ku xusan qodobkan farqadiisa 1aad wuxu qiimaynayaa arrintan, waxuuna ku dhaqaaqayaa talaabo kasta oo ay u arkaan inay macquul tahay si loo gaaro xal sharciga waafaqsan oo ay ku qancaan dhammaan dhinacyada.
4) Guddiyadu waa in ay cabashada si rasmi ah loogu soo gudbiyay go'aan uga gaaraan muddo 30 maalmo shaqo gudahood. Hadii dhinacyada midkood ku qanci waayo wuxuu cabashadiisa u gudbisan karaa hay'addaha garsoorka sida ku cad Qodobka 16aad ee sharcigan.
5) Guddigu waa inuu xafidaa xogta, macluumaadka iyo qoraallada ay maalgashatada u soo gudbiyaan.
6) Xeer-nidaamiye gaar ah ayuu Wasiirku ku soo saaraya habraacyadda loo marayo maareynta cabashooyinka la xiriira maalgashiga.

### Qodobka 16aad

**Xallinta Khilaafaadka**

1) khilaafaadka maalgashi ama khilaafaadka la xiriira fasiraadda sharcigan ee ka dhax-dhasha dhinacyada maalgashiga waxaa si deg deg ah oo hufan loogu xalinayaa wadatashi iyo wadahadal dhax-mara dhinacyada si waafaqsan qodobka 15aad.
2) Haddii xal togan laga gaari waayo, dhinacyada maalgashiga waxay xaq u yeelanayaan inay cabashadooda u gudbiyaan hay'adaha garsoorka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
3) Dhinacyadu hadii ay ku qanci waayaan go'aannada garsoorka dalka, waxa ay u gudbin karaan khilaafkooda xarumaha caalamiga ah ee xalinta khilafaadka Maalgashiga oo ay Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya xubin ka tahay sida;
   I. The International Center for Settlement of Investment Disputes (ICSID) (Convention Arbitration);
   II. The Additional Facility of ICSID (if Convention Arbitration is not available)
   III. The Arbitration Rules of the United Nations Commissions for International Trade Law (UNCITRAL Rules);
4) Go'aannada ka soo baxo xarumaha ~~ee~~ qodobkan faqradiisa 3aad ku xusan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in ay dhaqangelisaa.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA
THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA
JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## CUTUBKA 6AAD
## QODOBO ISKU DHAFAN
### Qodobka 17aad
### Xeer-Nidaamiyeyaasha
### (Regulations)

Wasiirku waxa uu soo saaraya xeer nidaamiye lagu hirgelinayo sharcigan si loo gaaro u-jeedooyinkiisa.

### Qodobka 18aad
### Iska-Hor-imaadka Sharciyada

Haddii ay dhacdo in ay iska hor yimaadan qodobada sharcigan iyo qodobo sharci kale oo la xidhiidha maalgashiga, qodobada sharcigan ayaa mudnaanta yeelanaya.

### Qodobka 19aad
### Qodobbada Kala-guurka

1) Maalgashiyada jira ee ku salaysan Heshiisyo Maalgashi oo Laba-geesood ah ama ka badan ka hor dhaqangalka Sharcigan waa la dhawrayaa ilaa iyo muddada ay ku egyihiin, si waafaqsan shuruudaha heshiisyadaas.
2) Maalgashi kasta oo la sameeyo dhaqan galka sharcigan kadib waxaa lagu dhaqayaa sharcigan.
3) Si waafaqsan shuruucda dalka iyo xeerarka caalamiga ah, Dowladaha xubnaha ka ah DFS ma gali karaan heshiis maalgashi oo aysan qeyb ka aheyn DFS.

### Qodobka 20aad
### Dhaqangalka Sharciga

Sharcigan wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka BJFS, saxiixana Madaxweynaha JFS, isla markaana lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.